Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

# **1915 (c) Isbeddelada ka-dhaafitaanka:** Macluumaadka kooban ee faallooyinka dadweynaha iyo jawaabaha Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS, Office of Developmental Disabilities Services)

ODDS waxay soo uruurisay faallooyin dadweyne laga bilaabo Agoosto 5–Sebtembar 4, 2024, oo ku saabsan isbeddellada loogu talagalay:

- Ka-dhaafitaanka dadka waaweyn,
- Ka-dhaafitaanka carruurta,
- Ka-dhaafitaanka Shaqsiyaadka Caafimaad Ahaan Nugul,
- Ka-dhaafitaanka Carruurta Caafimaad Ahaan Arrinka Ku Lug Leh,
- Ka-dhaafitaanka Caafimaadka Habdhaqanka, iyo
- Ka-dhaafitaanka Carruurta Qabta Baahiyaha Qayrucaadiga ah.

Wuu mahadsan yahay qof kasta oo dhiibtay faalo iyo fikrado. Faallooyinka ayaynu ku soo koobnay shaxda hoose. Waxaan sidoo kale sharraxnay in aan isticmaalnay soojeedinda aad bixisay si aan u cusboonaysiino ka-dhaafitaanada qabyada ah. Macluumaadkan waxaynu ku darnay ka-dhaafitaanada kamadambaysta ah sida xeerarka federaalka ay na farayaan.

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Faallo ka timid:** Qoyska helaya adeegyada ODDS |

| |
|---|
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka: Faalo ku saabsan ka-dhaafitaanka dadka waaweyn.**<br>Walaaca laga qabo in beddelida aqoonta iyo shahaadooyinka Maareeyeyaasha Kiiska iyo Qiimeeyeyaasha Kiiska ayaa hoos u dhigi karta heerarka. Waxaa la soo jeediyay in lagu daro tafaasiisha tababarka kahor inta aan hawsha la bilaabin. |
| **Jawaab-celinta ODDS:** Waxaan qabnaa in shaqaalaha cusub ay heli karaan tababarkan kadib marka ay hawsha bilaabaan balse kahor inta aysan bilaabin hawsha maareynta kiisaska. Wax isbeddel ah kuma samaynayno ka-dhaafitaanka khuseeya codsigan. |

| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
|---|
| **Faallo ka timid:** Qoysaska helaya adeegyada ODDS |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka: Faallada Ka-dhaafitaanka Carruurta Qabta Baahiyaha Qayrucaadiga ah**<br>Saddex faallo oo lagu codsanayo in lagu kordhiyo carruur badan si loogu daro carruurta oo dhan ee xaqa u leh liiska sugitaanka. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Kama haysano oggolaansho sharci-dejiyayaasha si loo sameeyo isbeddelkan. Wax isbeddel ah kuma samayn doono ka-dhaafitaanka wakhti xaadirkan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
| --- |
| **Faallo ka timid:** Qoyska helaya adeegyada ODDS |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka: Faallada Ka-dhaafitaanka Carruurta Qabta Baahiyaha Qayrucaadiga ah**<br>Awoodda ka-dhaafitaanka ee dhigaashan waa in lagu daraa ka-dhaafitaankan marka<br>• adeegyada guriga lagu bixiyo loo baahan yahay si looga fogaado in ilmaha uu ka baxo guriga ama si loo hubiyo daryeel habboon<br>• oo waalidkuna uu yahay ikhtiyaarka keliya ee laga heli karo daryeel ammaan ah oo habboon. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Kama haysano oggolaansho sharci-dejiyayaasha si loo sameeyo isbeddelkan. Wax isbeddel ah kuma samayn doono ka-dhaafitaanka wakhti xaadirkan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
| --- |
| **Faallo ka timid:** Qoyska helaya adeegyada ODDS. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka: Faallo ku saabsan ka-dhaafitaanada Caafimaadka Habdhaqanka.** |

| |
|---|
| Waxaa jira walaac ku saabsan dhimista tirada dadka. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Carruurta u-qalanta waxay sidoo kale heli karaan ka-dhaafitaanka Carruurta. Fursadaha la dhimay waa kuwo aan laga faa'ideysan. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanka wakhti xaadirkan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Faallo ka timid:** Qoyska helaya adeegyada ODDS. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Taageero ayaa la bixiyay oo loogu talagalay oggolaanshaha Heerarka Daryeelka saxda ah marka ka-dhaafitaanada loo kala wareegayo. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waxaan ka mahadcelinaynaa jawaab-celintan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
| --- |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Hadalladii hore ee ku saabsanaa Baaritaanka Hore iyo Baaritaanka Kaltansan, Ogaanshaha Xaaladda, iyo Daaweynta (EPSDT) sixid ayay u baahan yihiin. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waan sixi doonaa tixraacyadan hore. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
| --- |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Dadka ku jira barnaamijka Healthier Oregon Program waa in lagu daraa Ka-dhaafitaanka Carruurta Qabta Baahiyaha Qayrucaadiga ah. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Barnaamijka Caafimaadka Oregon wuxuu isticmaalaa miisaaniyad guud ee ma adeegsado Medicaid. Tani waxay ka dhigan tahay in aan lagu dari karin ka-dhaafitaanka 1915(c). Sharciga SB91 ayaa sidoo kale sheegaya in laga yaabo in aan la isticmaalin lacagaha guud ee aan lagu beegin lacagaha Medicaid ee dawladda dhexe. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanka |

| |
|---|
| wakhti xaadirkan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Ka-dhaafitaanka carruurta iyo dadka waaweyn waa inaysan lahayn liisas sugitaan. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waan oggolnahay waana waafaqsanahay in ka-dhaafitaanada Carruurta iyo Dadka Waaweyn aysan lahayn liis sugitaan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Dadka haysta Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta (CHIP) waa inay helaan ka-dhaafitaanada iyo adeegyada qorshaha gobolka ee loo maro Qorshaha Caafimaadka ee Oregon. |

**Jawaab-celinta ODDS:**

Waxaan kooxda u-qalmitaanka Medicaid 435.229 ku daraynaa ka-dhaafitaanda kuwaasi oo ay ku jiraan dadkii haysan jiray CHIP oo hadda haysta Medicaid. Tani waxay u saamixi doontaa inay helaan ka-dhaafitaanka ODDS 1915 (c).

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay**

**Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**

Sharciga Oregon ma oggola in la wareejiyo arrimaha mas'uuliyadda. Oggolaanshaha wakiil la cayimay marka qofku saaran tahay mas'uuliyadda sharciga ah ayaa noqon karta mid aan habboonayn.

**Jawaab-celinta ODDS:**

Sharciyadda Oregon waxay u oggolyihiin wakiilka la cayimay, oo uu ku jiro mas'uulka sharciga ah ee aan ahayn bixiyaha lacagta la siiyo, inuu metelo qofka. Uma haysano inay tani wareejinayso mas'uuliyadda. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanada wakhti xaadirkan.

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay**

**Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska

| |
|---|
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Xogta degmada iyo gobolka guud waa in la uruuriyaa si loo hago siyaasadda iyo ku-dhaqanka iyo si loo yareeyo adeegsiga xannibaadaha. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Dhammaan ka-dhaafitaannada 1915 (c) waxay uruuriyaan xog marka ay jiraan xannibaado khaldan iyo xannibaada aan ikhtiyaariga ahayn iyadoo lagu sameeyo 100% dib-u-eegis xogta gobolka guud. Waanu boogaadinaynaa talladan. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanada wakhti xaadirkan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Waa inay jiraan dooqyo badan oo loogu talagalay bixiyeyaasha Adeegyada Maareynta Maaliyadda. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Oregon waxay isticmaashaa hannaan furan oo loollan leh si ay u socodsiiso bixiyeyaasha Adeegyada Maareynta Maaliyadda. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanada wakhti xaadirkan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |

| |
|---|
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Adeegyada shaqo ee ka-dhaafitaanka carruurta waa inaysan u baahnayn ka-dhaafitaan. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Sharciyada dawladda dhexe waxay yiraahdaan Adeegyada Shaqo ee ay maalgeliso Medicaid waxaa la isticmaali karaa oo keliya haddii aan laga helin dugsiga ama Xarunta Baxnaaninta Xirfadda. Tababarka Shaqo wuxuu u baahan yahay oggolaanshaha ODDS ee loogu talagalay dadka da'doodu ka yar tahay 16 jir. Dhammaan adeegyada kale ee shaqaalaynta waxay u baahan yihiin oggolaanshaha ODDS ee loogu talagalay dadka da'doodu ka yar tahay 18 jir. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanada wakhti xaadirkan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Guddiga Qabanqaabada Isku-dubbarididda Hawlaha (MOCSC) ee Medicaid/CHIP waa inay ku jiraan dadka hela oo bixiya adeegyada ee ma ahan khubarrada iyo maamuleyaasha oo keliya. |

| |
|---|
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>MOCSC waxay isku-duwdaa hawlaha Medicaid ee OHA iyo ODHS. Waxaa jira Goleyaal/Komishano kale oo gobolka oo dhan ka jira kuwaasoo dadka qaata iyo kuwa bixiya adeegyada ay ka dhiiban karaan aragtidooda. ODDS ma qorshaynayso inay codsato balaadhinta guddiga hadda jira si loogu daro danwadaagta xubnaha ahayn. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Habka lacag-bixinta ee hadda jira ma dhiirigelinayo dhimista adeegyada Tababarka Shaqo. Way fiicnaan lahayd in la helo sicir saacadle ah oo sahlan oo ay ku jiraan dhammaan kharashaadka la filayo. Shan sano waa muddo aad u dheer in la gaaro kahor inta aan la cusbooneysiin sicirrada. Isbeddellada soo noqnoqda kuma noqon doonaan kuwo xasilloon si loo sameeyo qorsheynta bixiyaha. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waxaan ka mahadcelinaynaa jawaab-celintan. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanda wakhti xaadirkan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |

**Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**

Khidmadda la qiimeeyay ee adeegga (RFS) ee loogu talagalay hay'adaha maareeya kiisaska uma eka in lagu muujinyay ka-dhaafitaanka. Xaddiga tirada adeegyada la bixiyo waa in meesha laga saaraa ama la fududeeyaa si loo helo dabacsanaan oo loo isticmaalo lacagaha degmada ee loogu talagalay lacag-bixinta. Maxay tahay sababta lacagaha loo maro isku beegida maxalliga ah ay ugu baahan yihiin buuxinta waraaqo dheeraad ah, oo adag? Ka-dhaafitaanku ayaa u muuqda mid hay'adaha maareeya kiisaska ay lacag ku helaan kulan kasta oo xaq u yeelasho (hal qof maalintii), balse ay xaddidaad jirto.

**Jawaab-celinta ODDS:**

Waxaan ka mahadcelinaynaa jawaab-celintan. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanda wakhti xaadirkan.

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay**

**Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**

Ku xaddidida maareynta kiisaska bixiyeyaasha gaarka ah ee la xushay sannado kahor ayaa u muuqata mid cadaalad-darro ah. Waa inuu jiraa hab cad oo loogu talagalay bixiyeyaasha cusub. Nidaamka hadda jira ee hay'adaha maaraynta

| |
|---|
| kiisaska, ee kala duwan iyo aan sinnayn ma noqon karo habka ugu wanaagsan ee wax looga qabto baahiyaha aan la daboolin ee nidaamkayaga hadda jira. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waan ka mahadcelinaynaa jawaab-celintan. Ma tixgelinayno inaan isbeddelo ku samaynno qaab-dhismeedka maareynta kiisaska wakhti xaadirkan. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanda wakhti xaadirkan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>ODDS waa inay taageertaa oggolaanshaha deegaanka ee degmooyinka si ay ugu shaqeeyaan barnaamijyada CDDP-yada. Degmooyinku waa inay lahaadaan xaqa ugu horreeya ee diidmada. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Sharciga Oregon wuxuu u saamaxayaa degmooyinka inay dejiyaan oo maamulaan barnaamijyada CDDPs. Isbeddel sharci ah ayaa loo baahan doonaa si ay degmooyinku u helaan xaqa diidmada. ODDS ma qorsheynayso inay codsato isbeddelkan. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanda wakhti xaadirkan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Oregon waxay heshay wakhti ay ku bilowdo hoyga taageerada qoyseed. Carruurtan ayaa loogu adeegi karaa xannaanada carruurta ee joogtada ah. Guryaha taageerada qoyseed hadda in badan looma baahna. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waxaan ka mahadcelinaynaa jawaab-celintan. Ma qorsheynayno inaan meesha ka saarno Guryaha Taageerada Qoyseed wakhti xxadirkan. Wax isbeddelo ah laguma samayn doono ka-dhaafitaanda wakhti xaadirkan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Waa inaan sii wadnaa mamnuucida daawooyinka xakamaynta. Waa inaan sii wadnaa mamnuucida isticmaalka daawooyinka si ku habboon shaqaalaha ama si loo xakameeyo dabeecadda. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waan oggolnahay. Xakamaynta daawooyinka waa ka mamnuuc xeerarka ODDS ee ka jira goobaha oo dhan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |

| |
|---|
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>CMS waa inaysan waajibin heerka daryeelka hay'adaha ee gobolada aan hadda lahayn mac'hadyda. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>CMS ayaan jawaab-celintan u gudbin doonaa. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha Maareynta Kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>CMS waa inay dhiirigeliyaan isticmaalka adeegyada qorshaha gobolka beddelka adeegyada ka-dhaafitaanka. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>CMS ayaan jawaab-celintan u gudbin doonaa. |

Dokumeentigan waxaad ku heli kartaa:

- luuqado kale,

- far waaweyn,
- farta indhoolaha,
- ama qaabka aad doorbidayso.

Waxaad ODDS kala xiriiri kartaa lambarka 503-945-5811. Waynu aqbalnaa nooc kasta oo adeegga gudbinta ah oo loogu talagalay dadka ah:

- Dhegoolaha,
- Maqalku ku Adag Yahay,
- Dhegoole-Camoole,
- Camoole,
- arag cawiran.
-

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegga gudbinta booqo https://www.oregonrelay.com ama https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.